

## **Waxbarashada Gaarka ah iyo COVID 19**

Gudoomiye DeWine ayaa amray in la xiro dugsiyada Ohio. Waxaa jiro suurogalnimada ah in dugsiyada ay sii xirnaadaan inta ka hartay sanad dugsiyeedka.

### **? Dugsigu ma qasab baa inuu adeegyada waxbarashada bixiyo inta lagu jiro mudada ku meel gaarka ah ee dugsiyadu xiran yihiin?**

Dugsiyada qasab kuma ahan inay adeegyada waxbarashada baxshaan haddii ay bixiyan shuruudaha saacada ugu yar ee qasabka uu ka dhigaayo gobalka marka la gaaro dhammaadka sanad dugsiyeedka.

### **? Haddii dugsi uu bixiyo adeegyada waxbarashada, maxaa qasab ah inuu sameeyo si uu u buuxsho baahiyaha waxbarashada ee ardaydiisa naafada ah?**

Si loo raaco tilmaanta ay soo saarta Waaxda Waxbarashada ee Ohio (Ohio Department of Education), degmooyinka dugsiyada bixinaaya adeegyada waxbarashada inta lagu jiro xirnaanshaha ku meel gaarka ah ee dugsiyadu waa inay sameeyaan arimaha soo socda:

- Haddii degmada dugsigu bixinayso waxbarasho oonleen ah, waa inay samaysaa dadaal daacadnimo ku jirto sidi ay u xaqiijin lahayd in ardayda naafada ah ay helaan kumbuyuutar iyo khadka internetka.
- Dhammaan ardaydu waa inay helaan agabka iyo tignooloojiyadaha qasabka u ah waxbarashada oonleenka ah.
- Adeegyo kasta oo dheeraad ah waa inay ku jiraan awooda bixinta casharada sida gaarka ah loo naqshadeeyay, taageerooyin, iyo adeegyada la xariira ee ku jira Qorshayaasha IEP da iyo 504 ga ilaa heerka macquulka ah ayadoon khatar la galinayn caafimaadka ama badqabka ardayda, macalimiinta, iyo shaqaalaha.
- Dugsigu waa inuu sidoo kale la socdaa adeegyada lagu bixiyo Qorshayaasha IEP da iyo 504.
- Dugsigu waa inuu bixiya baxnaaninada kale (tusaale, tababarada barbaarinta shaqada, jirka, dhimirka, io hadalka) markay suuragal tahay.
- Dugsigu waa inuu ka fakaraa in agabka kaalmaatiga iyo/ama agabka tignooloojiyada kaalmaatiga ah lasii wadi karo in la bixiyo.

### **? Ka waran hadii dugsi uu siinaayo adeegyada waxbarashada ardayda laakiin uusan awoodin inuu buuxsho baahiyaha ardayda naafada ah?**

- Dugsigu wuxuu u baahan doonaa inuu fiiriyo adeegyada magdahwga waxbarashada uuna balaarsho adeegyada sanad dugsiyeedka.
- Waxbarasho kasta oo magdhaw ag ama adeegyada sanad dugsiyeedka la dheereeyay waa inay waafaqsan yihiin baahiyaha arday kasta oo arintaasi samaayn ku leedahay.
- Degmo dugsi ma abuuri karto xeer camuum ah dhammaan ardayda naafada ah.

### **! Dugsiyadu waa inay buuxshaan xiliyada soo socda ee u cayiman qorshayaasha IEP da ama ETR.**

- Kullanaada noocaas ah ayaa lagu qaban karaa taleefanka ama shirka muuqaalka ah.
- Saxiixyada waxaa lagu aruurin karaa boostada, iimeelka, ama qaabab elektaroonig ah.



### **Dugsiyada ayaa masuul ka ah aqoonsiga ardayda qabi kara naafada inta lagu jiro mudada ku meel gaarka ah ee dugsiyadu xiran yihiin.**

- Degmadu waa inay samaysaa qiimaynta hore ayna dhamaystirtaa ETR mudada 60 maalmood gudahood ah ee qasabka ah ilaa heerka macquulka ah.
- Dib u dhacyada qaar ayaa imaan kara haddii xirnaanshaha dugsiyada hor istaago aruurinta iyo akhrinta diiwaanada ama qiimaynta tooska ah.



### **Sidee ayay mudada xirnaanshaha ku meel gaarka ah ee dugsiyada u saamaynaysaa cabashooyinka la xariira dugsiyada ee hadda ay baaritaanka ku wado Ohio Department of Education?**

- Baaruhu waa inuu go'aanshaa haddii baaritaanka lasii wado karo asagoo ka eegaaya xogta uu horay uga helay waalidka iyo dugsiyada.
- Baahida loo qabo xog dheeraad ah ayaa taageeri karta in mudada lagu daro 60 maalmood.
- Baaraha ayaa u sheegi doona waalidka iyo dugsiyada degmada haddii la kordhiyay mudada cabashada.



### **Waa maxay talaabooyinka horudhaca ah ee waalidka arday naafada ah uu qaadi karo si loo xaqiijiyo in cunugiisu helaayo adeegyada ku haboon inta lagu jiro mudada xirnaanshaha dugsiyada ee ku meel gaarka ah?**

- La xariir agaasimaha waxbarashada gaarka ah ee degmada dugsiyada ama maamulaha dhismaha si aad u hesho xog la xariirta:
  - o Adeegyada waxbarashada ee la siinaayo cunugaaga inta lagu jiro mudada xirnaanshaha ku meel gaarka ah ee dugsiyada iyo dadaalada degmada dugsiyada ka samaynayso xaqiijinta in cunugaagu helaayo casharada gaarka ah, taageerooyinka, iyo adeegyada la xariira ee ku cad qorsheeya IEP da ama 504;
  - o Xaalada qiimayn hore iyo jadwalka la qorsheeyay ee kullanka IEP da ama ETR ka sanad laha ah; iyo/ama
  - o Si aad u samayso codsi kasta oo la xariira adeegyada.
- Codso tignooloojiyada la heli karo, baxnaaninada, cashar gaar ah, iyo/ama taageerooyin si qoraal ah, oo hayso nuqul kamid ah codsiyada ood diiwaankaaga gashanayso sidoo kale.
- Joogtee kalaandarka si aad ula socoto codsiyadaada hooyga iyo adeegyada, iyo jawaabaha laga baxsho codsiyadaas, oo qor sida isgaarsiintu u dhacday (tusaale, taleefanka, iimeelka, waraaq, iwm.).
- Qor Kaleendhar si aad u xisaabiso inta daqiiqo oo cashar gaar ah iyo adeegyada la xariira (sida baxnaaninta hadalka ama shaqada) ee cunugaagu helaayo si ay kaaga caawiyaan go'aaminta in wax waxbarashada magdhawga ah uu cunugaagu ku leeyahay dugsiyada marka dugsiyada dib loo furo.
- Haddii aad tahay waalid danyar ah kaasoo aaminsan in dugsiyada uusan bixinayn adeegyo cadaalad ah oo cunugaaga naafada ah la siiyo, la xariir xafiiska legal aid ee deegaankaaga si lagu caawiyo.



### **Ilaha Dheeraadka ah:**

The Ohio Department of Education (ODE) waxay sidoo kale soo saartay xaashida xogta oo ciwaankeedu yahay "Ka baaraan dagista arimaha La xariira Ardayda Naafada ah inta lagu jiro Xirnaanshaha Dhismaha Dugsiyada ee Dawlada Ohio Amartay" kaasoo laga heli karo [webseetka](http://www.ode.state.oh.us/education/ohio-education-department) ODE. ODE waxay sidoo kale diyaarisay xog dheeraad ah oo ah <http://education.ohio.gov/Topics/Student-Supports/Coronavirus>. Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka (U.S. Department of Education) waxay soo saartay buug shan bog ah "Xaashida Xogta ee Dheeraadka ah ee Wax ka qabashada Khatarta COVID19 ku leeyahay Dugsiyada Barbaarinta, Kan Hoose iyo Dugsiyada Sare markay U adeegayaan Ardayda Naafada ah" kaasoo laga heli karo barta <https://www2.ed.gov/about/offices/list/ocr/docs/ocr-coronavirus-fact-sheet.pdf>

Waxaan adeegyada sharciga oo bilaash ah siinaa danyarta Ohio iyo dadka waayeelka ah. Nasoo wac  
Isniinta-Jamcada 9 subaxnimo - 3:30 galabnimo

614.241.2001 (Bartamaha Ohio) 833.288.2936 (Koonfur-Bari Ohio)

740.383.2161 iyo 888.301.2411 (Degmooyinka Delaware, Marion, Morrow iyo Union)

*Legal Aid qofna uma takoorayso sababo la xariira isir, midab, wadanka uu kasoo jeedo, naafada, ama da'da  
marka la qoraayo, la daawaynaayo, ama uu ka qaybgalaayo barnaamijyadeeda, adeegyadeeda iyo  
shaqooyinkeeda, ama shaqada.*



franklin county  
**SENIOR**  
options



**OHIO ACCESS TO  
JUSTICE FOUNDATION**

**LSC**  
America's Partner  
for Equal Justice  
LEGAL SERVICES CORPORATION